4B

# JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOMAALIYA

WASAARADDA WAXBARASHADA IYO BARBAARINTA
XAFIISKA MANAAHIJTA

# JUQRAAFI

## FASALKA SADDEXAAD



F.A.

# JUQRAAFI

## FASALKA SADDEXAAD

## 3

WASAARADDA WAXBARASHADA IYO BARBAARINTA
XAFIISKA MANAAHIJTA

Buuggan lama daabacan karo lamana guurin karo iyadoo aan Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta laga helin ogolaansho

Waxaa lagu daabacay
Madbacadda Qaranka
XAMAR, 1975

# H O R DH A C

## BUUGGA JUQRAAFIGA FASALKA SADDEXAAD

Casharadda kitaabkan ku jiraa waxay u qaybsan yihiin afar qaybood. Waxa ugu horreeya sancooyinka iyo warshadaha maanta dalkeena jira iyo waxa ay wadanka u taraan. Qaybta labaad waxay ka hadlaysaa sida khariidadaha loo akhriyo ama loo garto waxay ka hadlayaan. Tan saddexaad waxay ku saabsan tahay qaabka dhulka iyo cimiladiisa, tan afraadna isgaarsiinta.

Qaybta hore haddii aynu eegno waxaynu ogaanaynaa, in maalin walba maalinta ka danbaysa ay sancooyinka iyo warshadaha dalku sii kordhayaan. Sidaa aawadeed waxa macallinka looga baahan yahay inuu la socdo wixii horumar ah ee wadanka ka socda si uu ardayda wixii uu ogaadoba casharadda ugu daro. Qaybta labaad oo ka hadlaysa khariidadaha akhriskooda, waxa loo bahan yahay in ardayda loo faahfaahiyo si ay marka danbe uga faa'iidaystaan waxay casharadaa ka bartaan. Ardaygu marka uu fasalka saddexaad dhameeyo, waa inuu samayn karaa khariidadda fasalkiisa, ta dugsiga iyo qaybo ka mid ah marba magaalada ama tuulada uu joogo. Heerkaa waxa la filayaa inuu ardaygu akhriyi karo waxyaalaha khariidadaha korkooda ku qoran badankooda.

Qaybta saddexaad uma baahna wax sii faahfaahisa oo aan ahayn sharax dheeraad ah, laakiin qaybta afraad waxay macallinka ku khasbaysaa malin walba inuu ogaado wixii kordhaya xagga isgaarsiinta oo uu ku daro inta buuggu tilmaamayo.

Waxa la arkaa in duruusta qaarkood ay gaagaaban yihiin. Haddii sidaasi dhacdo , macallinku ama waa inuu korodhsadaa, ama uu laba deris mid iskaga dhigi karaa.

Laylisyada duruusta ka danbeeyaa waa tusaalayaal. Macallinku sidaa aawadeed wuu kordhin karaa oo wixii kale ee uu u baahdoba wuu ku dari karaa.

Annaga oo filayna in buuggani ardayda waxbarashadooda sare u qaado, wuxuu xafiiska Manaahiijtu mahad u celinayaa Jaalle Cali Ducaale Faarax iyo Cabdi Axmed Shuuriye oo buugga qoray, kooxdii buugga garaacday iyo Cawil Maxamed Yaasiin oo sawirada iyo khariidadaha sameeyey.

(Bashiir Faarax Kaahiye)
Maamulaha Xafiiska Manaahijta, W.W. iyo Barbaarinta
XAMAR

# WERSHADAHA IYO SANCOOYINKA

## CASHARKA KOOWAAD

Ummad nolosheedu waxay toos ugu xiran tahay dheefta ay ka hesho nafleyda (berriga iyo badda), tacabka beeraha iyo sancooyinka. Dhaqaalaha adduunkuna waa kala geddisan yahay. Guud ahaan, waxan u qaybinaynaa wadamada:

1. Dhaqaalahoodu soo korayo. Wadammadaa oo Soomaaliya ka mid tahay waxa dhaqaalahoodu ku dhisan yahay beero ama xoolo (ama labadaba).
2. Wadammada hore u maray dhaqaalohooduna ku dhison yahay wershado iyo sancooyin.

Arrintii oo sidaas ah wadamada dhaqaalahoodu soo korayaa waxay ku dadaalayaan sidii ay dhaqaalahooda uga dhigi lahaayeen mid wershado ku dhisan. Farsamadu waxay ku bilaabmaysaa wershado yar-yar oo lagu sameeyo alaabta qeerin ee laga soo saaro waddankooda. Wershadaynta yar-yar waa in talaabo-talaabo sare loogu qaado, marka wadanka gudihiisa lagaga haqab beelana dibedda loo dhoofiyo si ay sayladaha adduunka ugu ganacsi geeyaan.

Waddanka Soomaaliya wuxuu ka mid yahay waddamada soo koraya. sidaa darteed wershadihiisu waa kuwo da' yar. Dawladda Soomaaliyeed ee kacaanka ahi waxay ku dadaalaysaa:

1. In marka hore laysku xiro oo la hore mariyo wixii sancooyin jirey.
2. In laysku xiro oo la xoojiyo midaynta sancooyinka iyo beeraha.
3. In la abuuro sancooyin lagaga maarmo wixii dibedda laga keeni jirey.
4. In barnaamij horumarin ah loo dejiyo sancooyinka yar-yar. Dawladda Kacaanka ahi himilooyinkeeda waxa ka mid ah in:
   - b) la abuuro ururo lacag la deymiyo (Iskaashatooyin),
   - t) Xagga sancadana laga taageero Iskaashatooyinkaas.
   - j) Waano joogta ah iyo waxbarasho had iyo jeer dadkaa la siiyo.
5. In la wado sahamin joogta ah oo lagaga fekerayo meelaha mashaariic qaadi karta iyo meelaha horumain u baahan.

**LAYLIS:**

Goobaabin geli xarafka ka horreeya jawaabta saxa ah:

1. Dhaqaalaha adduunka hadda ugu sareeya waa ka ku dhisan:-
   b) Beeraha
   t) Wershadaha.
   j) Xoolaha
2. Waddamada soo korayaa waa kuwa:-
   b) alaabta qeerin loo keeno ee ku sameeya wershadohooda.
   t) aan waxna dibedda ka qaadan waxna u dirin.
   j) alaabta qeerin laga qaato, marka la soo habeeyana qiime sare lagaga iibiyo.
3. Haddii wershad la doonayo in la dhiso waa in:-
   b) Magaalo madaxda laga dhisaa.
   t) Meeshii walba laga dhisaa.
   j) Meel ku haboon loo sahamiyaa.
4. Wershadaha wadankeenu waa kuwo:-
   b) da'yar.
   t) da'weyn.
   j) birta sameeya.
5. Qor shan (5) wax oo loo baahanyahay inta aan wershad la dhisin.



CASHARKA LABAAD

## SANCOOYINKA WADDANKA JIRA

**Sancooyinka jira waxan u kala qaybinaynaa:**

1. **Wixii beeraha ka soo baxa:**
   b) wershadda sonkorta ee Jowhar.
   t) Wershadaha badarka shiida ee ku kala yaal Xamar, Hargeysa, iyo Baydhabo.
   j) Wershadda khudradda habaysa ee loo yaqaan ITOP ee ku taal maagaalada Afgooye.
   x) Wershadda dharka ee Balcad.
2. **Sancooyinka la xiriira xoolaha:**
   b) Wershadda hilibka ee Kismaayo.
   t) Wershadda caanaha ee Xamar.
   j) Wershadda Kalluunka ee Laas-qoray iyo mid yar oo ku taal Qandala.
3. **Sancooyinka kale:**
   b) Wershadda samaysa Sigaarka iyo Taraqa oo ku taal magaalada Xamar.
   t) Tan biraha ee Xamar.
   j) Wershadda (Inkar) oo lagu sameeyo caagga iyo qardaasyada Muuska lagu dhoofiyo ee ku taal Jamaame.
   x) Wershado yaryar oo kooka-koolaha, Nacnaca, Haamaha iyo wixii la mid ah sameeya.

**Baahida Wershadaha:**

Guud ahaan wershaduhu waxyaalo badan ayey u baahan yihiin. Baahidaa kuwa ugu waaweyn waxa ka mid ah oo lagama maarmaan ah:

1) In wershadda loo sahamiyo meel ku habboon. Taasu waxa weeye meeshaas waa inay noqoto meel sida ugu kharash yar looga helayo alaabta qeeri ee wershadda lagaga shaqaynayo.

2) In la fiiriyo sida ugu habboon ee alaabta wershaddu habeyso loogu diri lahaa meelaha looga baahan yahay dalka gudihiisa ha ahaato ama dibeddiisaba.

3) In laga fekero suuq loo ganacsi geeyo alaabta wershashaddu soo saarto.

4) Waxa lagama maarmaan ah gaadiid habboon iyo jidad wacan oo:
   b) Haddii wershadda alaab qeerin la geynayo ama mid la habeeyey laga qaadayo aan dhib lagala kulmin.
   t) Dekeddo wershadaha ku dhow oo wixii alaab dibedda loo dirayo laga dhoofiyo.

5) In loo hayo lacag joogta ah oo lagu hore mariyo ama lagu haggaajiyo wershadda.

6) In la hayo shaqaale cilmi u leh shaqada wershaddu qabanayso.

7) In la hubiyo wershadda la taagayaa in ay heli doonto alaab lagu habeeyo oo qeerin. Wershaddaha Soomaaliya waxa loogu talagalayaa in lagu habeeyo khayraadka dabiiciga ah oo ka soo jeeda xoolaha nool, kalluunka, tacabka beeraha iyo macdanta wixii jira.

Duruusta soo socota waxaynu wax kaga taataabanaynaa wershadaha waaweyn ee dalka.

**LAYLIS:**

1. Sheeg shan (5) Wershaddood oo waddanku leeyahay, iyo magaalooyinka ay ku yaalliin.
2. Sheeg afar (4) baahiyood oo wershadduhu aanay ka maarmin.
3. Sheeg Saddexda Wershadood ee Wershadaheenna ugu waaweyn.



CASHARKA SADDEXAAD

## WERSHADDA HILIBKA EE KISMAAYO



Gobolka jubbada Hoose ee wershaddu ku taal waa gobolka waddanka ugu lo'badan. Isla markaa magaalada Kismaayo waxa ku taal deked aad u wacan oo laga dhoofin karo wixii wershaddu ay soo saarto ee dibedda loo dirayo. Wershadda

waxa dhismeheeda la bilaabay 1963 waxaana lagu dhisay heshiis dhexmaray dawladda Ruuska iyo dawladda Soomaaliyeed. Wershaddu horumar weyn bay samaysay awoodeeddii oo dhanna way soo saartaa. Horumarkaa waxaynu ka arki karnaa tusaha hoos ku yaal:

| Sannadka | Lo'da Wershaddu qashay | |
|---|---|---|
| 1969 | 2,313 | neef |
| 1970 | 16,320 | neef |
| 1971 | 38,072 | neef |
| 1973 | 52,620 | neef |

Waxaan tusahaa ka arki karnaa horumarka ballaaran oo wershaddu sannadba sannadka ka dambeeya ay qaadayso. Wershadda waxa hadda ka yar awoodda qaboojinta. Waxay qaboojin kartaa 360 tan oo hilib ah, waxase lagu tala jiraa in la kordhiyo oo la gaarsiiyo 1,000 tan. Taasu waxay markaa wershadda u suura gelindoontaa in ay biiriso hilibka xoolehenna oo ay dirto isaga oo aan la qasacadayn. Waxa markaa loo meelayey lacag dhan 3,000,000 oo hawshaa lagu qabto.

**LAYLIS:**

1) Sheeg laba sababood oo wershadda hilibka looga dhisay magaalada Kismaayo.


Goobaabin geli xarafka ka horreeya jawaabta saxa ah:

1) Wershadda Hilibka waxa la dhisay,
   b) 1960, t) 1963, j) 1964, x) 1965,
2) Wereshadda Hilibka waxa wada dhisay:
   b) Dawladda Jarmalka iyo ta Ruuska.
   t) Dawladda Ingiriiska iyo ta Soomaalida.
   j) Dawladda Soomaalida iyo ta Ruuska.
3) Jubbada Hoose way ugu:
   b) Ari badan tahay.
   t) Geel badan tahay.
   j) Lo'badan tahay.
4) Sannadkii 1973kii lo'da lagu qalay wershadda Hilibka ee Kismaayo waxay dhamayd:
   b) 38.943, t) 40109, j) 52.620 neef.
5) Wershadda waxa lagu qalaa:
   b) Geel, iyo lo'.
   t) Lo' iyo ari.
   j) Lo' keliya.



CASHARKA AFRAAD

## WERSHADDA CAANAHA EE XAMAR



Weershadda Caanaha oo albaabada loo furay 1965 waxa loogu talagalay in ay maalintiiba soo saarto oo hagaajiso 20 tan oo caano ah. Wershaddu weli awoodeeda ugu sarraysa iyo mid u dhaw toonna ma gaarin. Sababatu waxa weeye in caano la waayey taasuna waxay ka timi iyada oo aan si wacan loo qorshayn meesha ay caanuhu ka iman lahaayeen.

Dawladda Kacaanka ahi waxay arrintaa ka qaadaysaa tallaabooyin cadcad oo ay ka mid yihiin:

1. In dadka lo'da ku haysta magaala madaxda iskaashatooyin loo sameeyo, si caanaheeda wershadda loo geeyo dadkuna uga nabad gallo dhibaha ay la iman lahaayeen caanaha aan la habayn.
2. Wershadda qaybo ka mid ah waxa lagu talo jiraa in la cusboonaysiiyo.
3. In lo' u gaar ah wershadda loo dhaqo. Hawlahaa aan kor ku soo sheegnay waxa loo qorsheeyey lacaga dhan shan malyuun oo ugu jirta jaangooyada 1974 ilaa 1978.

LAYLIS:

1. Wershadda Caanaha ee Xamar waxa loogu talagalay in ay soo saarto hagaajisana:

   b) 30 tan oo Caana ah.
   t) 45 tan oo Caana ah.
   j) 20 tan oo Caana ah.

2. **Ta saxa ah goobaab.**

   b) Wershedda Caanuhu awoodeedu ugu sarraysa ee waxa soo saaridda marna ma gaarin.
   t) Wershadda Cqnuhu waa gaartay awoodeedii soo saaridda ? u saraysay.
   j) (b) iyo (t) ba waa sax.


3. **Ta saxa ah goobaab:-**

   Dawladda Kacaanka ihi waxay ku tala jirtaa in:
   b) Laga raro wershadda meeshay ku taal.
   t) Lo'gaar u ah wershadda loo dhaqo.
   j) (b) iyo (t) ay hirgeliso.



CASHARKA SHANAAD

## WERSHADDA KALLUUNKA EE LAAS-QORAY




Dalka Soomaaliyeed waxa uu hodan ku yahay kalluun. In-kasta oo dalka baddiisu dheer tahay kalluuna hodan ku yahay, haddana dadweynaha Soomaaliyeed intiisa badani mallayga ma cunto.

Sababta ugu weyni waa xoola dhaqatada oo ka haqab la' hilib.

Inkasta oo cunidda kalluunku ku yar tahay dalka gudihiisa, waxaynu si weyn ugaga faa'iidaysan karaa ganacsiga dibedda. Markii la arkay qaniimadda xeebaheenna dhooban ayaa heshiis dhex maray dawladda Ruushka iyo Soomaaliya oo lagu dhisay wershad kalluunka lagaga shaqeeyo. Wershadda waxa laga dhisay magaalada Laas-Qoray. Tacabkii ugu badnaa ee wershaddu soo saartay waa 1087 tan oo tebeedi (Toona) ah sannadkiiba. Hase yeeshee, karaanka wershaddu waa 7,000, oo tan sannadkiiba. Si awoodeeda ugu sarraysa loo gaarsiiyo, waxay wershaddu ku tala jirtaa inay doonyaha jillaaba tiradooda 100 gaarsiiyo shaqaalahana 280 qof.

Waxa kale oo wershado kalluun ku yaaliin Qandala iyo Xaabo. Sida laasqoray ayaa magaalooyinkaa kalluun lagu habeeyaa, lagu milxiyaa oo laga dhoofiyaa


LAYLIS:

Weertu haday run tay «R» ku qor meesha u banaan, haddii **kalana «B» ku qor:**

1. Xeebta Soomaalidu waxay hodan ku tahay kalluunka.
2. Wadanka Soomaalida xeebtiisu waa ta labaad ee ugu dheer Afrika.
3. Xeebteenu waa ta u dheer Afrika.
4. Dadka Soomaaliyeed badidiisu kalluun buu ku nool yahay.
5. Dadka Soomaalidu kalluunka waa jecelyihiin.
6. Wershada laasqoray waxa wada sameeyay Soomaalida iyo Ingiriiska.
7. Tacabkii ugu badna ee wershadu soo saartay waa 1087 tan.
8. Wershadu waxay ku tala jirta in 500 oo doonyood oo jilaaba la sameeyo.
9. Kalluunka la milxiyo waxa lagu habeeyaa Qandala iyo Xaabo.
10. Wershadda Laasqoray waxa loogu talagalay in ay soo saarto 70,000 oo tan sanadkii.



## CASHARKA LIXAAD
## WARSHADDA DHARKA EE BALCAD



Wershadda Balcad ku taal ee dharka samaysa loona yaqaan «Somalteks» waxa markii hore wadajir u dhisay dawlada Soomaaliyeed iyo dad ka tirsan Jarmalka Galbeed. Waxaan qarsoonayn in wershadda dharka ay sannado badan shaqaynaysay, iyada oo marna aan ummadda huga ka haqab tirin. Wershadda oo soo saarta «Maraykaan», bafto iyo dhar midab leh «waxa qorshaynta sannadkan loogu talagalay sheegaysaa in la gesho lacag lagu cusboonayo.

Hantigelintaas waxa lagu keenayaa makiinado cusub oo kuwii hore beddela. Waxa kale oo lagu ballaarinayaa dhismaha wershadda. Sidaa darteed, waxa la filayaa waa tacab-soo saarka wershadda oo kor u kaca. Jaangooyada loo dejiyye tacab soo saarka sannadka (1974) waa sida soo socota:-

| | | |
|---|---|---|
| Maraykaan . . . . . . . | 4,500,000 | Yaardi |
| Bafto . . . . . . . . . | 2,250,000 | Yaardi |
| Midab . . . . . . . . . | 2,000,000 | Yaardi |
| Dhar dibadda laga Keeno . . . . . | ...................... | ................ |

Waxa kale ee wershaddu ku tala jirtaa in ay dhaqan geliso mashruuc lagu beerayo cudbi ku filan wershaddae, waayo waxa dhici jirtey in cudbiga 70 % wax ka badan dibedda laga soo iibin jirey. Maantase way dhibaato badan tahay waayo ascaartii cudbiga aad bay u kacday. Balcad 30 kilomitir ayey Xamar u jirtaa webiga Shabeellena waa maraa, carro wanaagsanna waa leedahay, waxa keliya oo ay u baahan tahay waa cudbi la beero.

**LAYLIS:**

Goobaabin geli xarafka ka horreeya jawaabta saxa ah:

1. Wershadda dharka ee Balcad waxa loo yaqaan:
   b) Soomaalita.
   t) Soomalteks.
   j) Wershaddaha Balcad.

2. Wershadda wadajir waxa u dhisay:
   b) Dawladda Sucuudi Caraabiya iyo Soomaalida.
   t) Jarmalka Bari iyo Soomaalida.
   j) Soomaalida iyo Jarmalka Galbeed

3. Kacaanka ka hor cudbiga dharka laga sameeyo boqolkiiba waxaa dibedda laga keeni jirey:
   b) 65 t) 78, j) 70.


4. **Weertu haddii ay run tahay «R» ku qor haddii Kalena «B» ku qor:-**

1. Balcad webiga Jubba mara.
2. Balcad dhul caro san ah ayay ku taallaa.
3. Webiga Jubba faa'iidooyin badan buu u lxyahay. wershadda Balcad.
4. Waxa lagu tala jira in cudbi loo beero wershada dharka.
5. Cudbi beerista faa'iido badani kuma jirto.



CASHARKA TODDOBAAD

## WERSHADDA SONKORTA EE JOWHAR



Wershadda Sonkorta ee Jawhar waxay ku taal webiga Shabeelle waxana la taagay 1926. Markii hore waxa dhisatay shirikad Talyaani ah. Wershaddu waxay soo saartay 1961-62 Sonkor dhan 12,500 oo tan. Iyada oo sidaas ah ayaa sonkor-

la waddanka laga isticmaalo waxa lagu qiyaasay 30,000 oo tan. 1963 ayaa dawladda Soomaaliyeed wax ku yeelatay wershadda (SNAI). Laakiin waxa lala wareegay oo la qarameeyey 1970. Tacabkii wershaddu markaa waa labanlaabmay oo waxa uu noqday 46,000 oo tan sannadkii 1960-70 (iyada oo awoodeedu tahay 50,000 tan).

**Haddaan isweydiino sonkortu sida ay u baxdo iyo** meesho **ay ka timaaddo** waxaan ogaanaynaa in geed «Aale» la yiraahdo oo geed gaab ah sonkorta laga sameeyo. Geedkaasu markuu baxo ayaa la gubaa, lana gooyaa, wershaddana la geeyaa. Dabadeedna inta ay wershaddu shiiddo ayey dheecaankiisa waxay ka sameysaa sonkor. Keedka **«aaluhu»** waxa uu ka baxaa dhulka aad u biyaha badan cimiladiisuna aad u kulushahay. Markaa Jowhar waa magaalo aad ugu habboon beeridda Aalaha. Waxa intaa u dheer magaaladu in ay leedahay wadooyin wacan oo suurta geliya in dhakhso loo qeybsho sonkorta la habeeyey.

Wershaddu waxyaalo kale oo sonkorta ka soo baxa ayey sameysaa waxa ka mid ah dacaska, Cadarka, Isbiirtada iwm.

L A Y L I S :

**Weertu haddii ay run tahay «R» ku qor meesha u banaan, haddii kalena «B» ku qor:**

1. Wershada Sonkorta waxa la dhisay 1926.
2. Waxa wershadda kolkii hore dhisay shirkad Ruush ah.
3. Sonkorta Soomaalidu isticmaasho waxa lagu qiyaasay 30,000 oo tan sannadkii 1970.
4. Warshadda mrakii la qarameeyey waxay ahayd 1970
5. Awooda wershadda ee soo saarista ihi wa 50,000 tan sannadkii.
6. Qasabka sonkorta laga sameeyo waxa uu u baahanyahay kul iyo biyo badan.
7. Jowhar cimiladeedu kuma habboona «Aalo» beerista.



CASHARKA SIDDEEDAAD

## WARSHADDA HABAYNTA KHUDRADDA EE AFGOOYE (ITOP)



Afgooye waa magaalo aad u qurux badan oo siddeed iyo labaatan kilomitir u jirta magaalada Muqdisho. Magaalada waxa mara Webiga Shabeelle cimiladeeduna sannaddii oo dhan waa kulayl, roobab badana wey heshaa, sidaa aawadeed waa meel sannada oo dhan wax laga beeri karo.

Isaga oo tixgelinaya sida ay Afgooye ugu habboon tahay wax beerista ayaa Bankiga Horumarintu ka dhisay wershad lagu habeeyo khudradda samaysana waxyaabaha la cabbo ee khudradda laga miiro.

Waxa kale uu Bankigu wershadda ugu tala galay in loo sameeyo beero ay ka baxaan khudradda kala geddisan oo ay ka mid yihiin mafafay, Liin, Cambe, Tamaandho (Yaanyo), iwm.

Wershaddu alaabta ay iminka habeeyso waxa lagu gataa dalka gudihiisa oo qura, waxase la filayaa in dhowaan dalal dibedda ah oo ay ka mid yihiin dalalka Carabta iyo dalka Talyaaniga loo diro.

## WERSHADO CUSUB

Waxa wershadaha aynu ka soo hadallay soo raaca wershado dhawr ah oo cusub oo dawlada kacaanka ahi ay asaastay. wershadahaas wax ka mid ah:-

1. Wershada Sigaarka iyo Tarraaqa ee Muqdisho.
2. Wershada Labanka iyo Teylka ee Afgooye.
3. Wershada Kartoonka iyo Bacda ee Jamaame (Inkas).
4. Wershada Birta ee Muqdisho.

Wershadahaas oo dhami hadda way shaqeeyaan, wayna ka qayb qaataan dhismaha dhaqaalaha dalka.

### LAYLIS:

Goobaabin geli xarafka ka horreeya jawaabta saxa ah:-

1. Wershadda khudradda ee Afgooye waxa loo yaqaan:

   b) Somalteks
   t) W. X. K. U.
   j) I. T. O. P.

   t) Waddanka dhexdiisa oo keliya.
   b) Kacaanka ka hor.
   t) Kacaanka dabadii.
   j) waqtigii gumeysiga.

3. Wershadda waxa dhisay.

   b) Bangiga Ganacsiga ee Soomaaliyeed.
   t) Wasaarada beeraha.
   j) Bangiga Horumarinta Soomaaliya.

4. **Alaabta wershaddu soo saarto waax lagu isticmaalaa:**

   b) Wadamada dibadda.
   t) Waddanka dhexdiisa oo keliya.
   j) (b) iyo (t) ba waa sax.

5. Magaalada Afgooye:-

   b) Waa kulayl sanadka oo dhan.
   t) Waa qaboow sanadka intiisa badan.
   j) Roobab yar bay heshaa sanadkii.




CASHARKA SAGAALAAD

## JIHEEYAHA


Waxa dadkii hore aad dhibaato ugu ahaa safarkii ay ku safrayeen badaha ama berrigaba ayaga oo haysan khariidadda dhulka si ay ku gartaan meeshii ay socdeen. Markaas waxa laga fekerey waxa la yiraahdo khariidad. Khariidadda si aad loogu garto waxa loo yeelay: Jihooyin, Astaamo, Fure iyo Midabo.

### JIHEEYE:

Waxa aad taqaanaa in ay jihooyinka waaweyni yihiin afar. Afartaas jiho waxa ka sii farcama afar kale oo u dhexeeya.




Jahooyinka waaweyn





Jahooyinka waaweyn iyo kuwii yaryaraa ee ka farcamay

Marka aad jihooyinkaas oo dhan si fiican u kala baratid waxa kuu fududaanaya meel alla meesha aad doontid in aad ku toosto. Haddaba meel hawd ah baad joogtaa cirkana daruuraa ku daboolan — qorax, dayax iyo xiddigo midna ma argtid. Ama dooni baad saaran tahay oo badda dhexdeedaad maraysaa. Sidee baad ku aqoonsanaysaa jihooyinkii?

Kani waa jiheeye! Waa alaab saacadda oo kale ah, waxa laga sameeyaa macdanta, waxa uu leeyahay fallaar afkeedu had iyo jeer tilmaamaayo woqooyi, salkeeduna koonfur. Jiheeyahaas baad isticmaali kartaa markii aad ogaatid fallaartiisu meesha ay u jeedaa inay tahay waqooyi, haddaad waqooyi garatana jihooyinkii kale oo dhan baad garan kartaa.





JIHEEYE


Khariidada waqooyigeedu had iyo goor waa kor, koonfurteeduna waa hoos. Adiga laftigaagu waxa aad samayn kartaa jiheeye caadi ah. Waxa loo baahan yahay in aad haysatid: Birlab, Irbad iyo jab yar oo geed laga jaray aadna khafiif u ah.

Irbadda caaradeeda hore ayaad ku xoqaysaa birlabta. Irbaddii oo caaradeedii hore birlabaysan tahay ayaad jabkii geedka ahaa kor saaraysaa markaas baad weel af bannaan (Saxan) oo in biyo ahi ku jiraan ku dhex ridaysaa. Laba daqiiqo ama saddex daqiiqo ka dib haddii aad u fiirsato waxa aad arkaysaa irbaddii oo caaradeedii dhinaca waqooyi u jeedo.

**LAYLIS:**

1. Maxaa dadkii hore ku kallifay in ay ka fekeraan khariidada dhulka?
2. Maxaa lagama maarmaan ah in aad taqaanid marka aad doonayso in aad ku safarto badda dhexdeeda?
3. Jiheeyaha maxaa laga sameeyaa, muxuuse faa'iido u leeyahay dadka?
4. Waxa aad isku daydaa in aad samaysid jiheeye?

## CASHARKA TOBNAAD
# ASTAAMAHA KHARIIDADDA




Khariidadda waxa loo yeelay astaamo laysla yaqaanno si akhriskeedu u fududaado. Haddii aad si wanaagsan u barato astaamahaas waxa aad akhriyi kartaa khariidad kasta oo kaa




hor timaada. Waxa jira astaamo aan laysla aqoon oo u gaar ah qofkii khariidahaas sameeyey waxa uu ula jeeday. Kuwaas waxa lagu muujiyaa furaha khariidadda.

**LAYLIS:**

1) Astaamaha khariidaddu maxay u faa'iideeyaan dadka?
2) Astaamaha laysla yaqaan kuwee baa ka mid ah?

CASHARKA KOW IYO TOBNAAD

## FURAHA KHARIIDADDA




Khariidad kastaa waxay leedahay astaamo laysla yaqaanno iyo sidaan u sheegnay kuwo aan laysla aqoon, had iyo jeerna lagu muujiyo furaha.

Furaha khariidaddu waxa uu muujiyaa astaamaha aan laysla aqoon oo ay ka mid yihiin. Dabeecadda gobol kastaa leeyahay, dhirtiisa, biyihiisa, xoolihiisa iyo wixii la mid ah oo dhan oo lagu qoro ama lagu sawiro khariidadda hoosteeda



iyada oo midabo kala duwan leh, si marka aad astaamahaas akhrisatid aad u wada garatid khariidadda oo dhan ujeeddada laga leeyahay.

**LAYLIS:**


1. Khariidadda aan astaamo iyo fure midna lahayn ma la akhrisan karaa?
2. Furaha khariidaddu muxuu muujiyaa?
3. Xaggee lagu sawiraa ama lagu qoraa furaha khariidadda?

CASHARKA LABA IYO TOBNAAD

## KHARIIDADDA FASALKA

Haddii aad doonayso in aad ku samaysid khariidadda fasalkaaga warqad cad sidee bay kuugu suuroobaysaa?

Bal shantaada farood iyo calaacashaada kor saar warqaddda, qalin caaradiisna ku wareeji faraha hareerahooda. Marka aad kor uga qaado xaashidii waxa aad ku arkaysaa shantaadii farood iyo calaacashaadii sawirkeedii. Isku day in aad fasalkaaga warqadda kor saarto. Kuuma suurowdo! Fasalkii waa in aad u yaraysaa si ay kuugu qaado warqaddu. Sidee baad u yarayn?






Waxa aad taqaanaa mitirka iyo sida wax loogu qiyaaso. Mitir u qaado oo fasalkaaga qiyaas. Waa imisa mitir dhererkiisu? Ballaarkiisuna waa intee? Ka soo qaad dhererkiisu in uu yahay 5 mitir ballaarkiisuna 3 mitir. Halkii mitirba waxa aad ka dhiganaysaa ama aad ku qiyaasanaysaa in uu le'eg yahay hal sentimitir. Fasalkaaga dhererkiisu waa 5 sentimitir, ballaarkiisuna waa 3 sentimitir waraaqda dusheeda. Markaas waxa kuu suuroobaya in aad fasalkaaga ku sawirtid warqad korkeeda, shay kasta oo weynna waxa aad ku sawiri kartaa warqad yar markii aad raacdid nidaamkaas isaga ah.



LAYLIS:

1. Ma kuu suurowdaa in aad fasalkaaga ku sawirtid warqad yar adiga oo aan yarayn? Sidee baadse u yarayn kartaa?
2. Waxa aad samaysaa khariidadda fasalkaaga, astaama u yeel si loo akhriyo khariidadaada?

## CASHARKA SEDDEX IYO TOBNAAD
# TUULO



Waxa aad taqaannaa sida loo sameeyo khariidadda fasalkaaga amase dugsigaaga oo dhanba. Waxa kale oo aad taqaannaa astaamaha khariidadda mid waliba waxay tahay. Hadda waxaan baranaynaa sida loo sameeyo khariidadda tuulada aad deggan tahay amase mid aad uun aragtay.


Tuulada waxa aad ku sawiraysaa xaashi cad adigoo ku muujinaaya khariidaddaada astaamaha tuuladu ay leedahay oo dhan: aqalladeeda, waddooyinkeeda, haddii ay leedahay werschad, masaajid, webi, ceelal iyo wixii kale ay leedahay.

Waa in aad khariidadda tuulada si fiican ugu muujisaa astaamihii aynu hore u soo baranay si khariidadda akhriskeedu u noqdo mid la garan karo. Waxa aad u samaysaa khariidadda qiyaas khariidadeed. Waxa aadna ka qiyaas qaadataa khariidaddii aad fasalkaaga u sameysay. Waxay tuuladuse kaga duwanaanaysaa, iyada mitirin meysid ee waad qiyaasaysaa.

**Tusaale:** Marka aad khariidadda samaysid ayaad halkii sentimitir oo xaashida dusheeda ahba ku qiyaasanaysaa in uu le' eg yahay kun mitir (1: 1,000).

Sawirka iyo khariidadda tuuladu way kala duwan yihiin. Khariidadda waxa aad ku muujin kartaa wax kasta oo tuuladaas ku yaalla. Waa in aad u samaysaa khariidadda fallaar tilmaamaysa waqooyi iyo koonfur si loo kala garto jihooyinka khariidadda.






## LAYLIS:

1) Maxaa lagama maarmaan ah in aad si fiican u muujisid markii aad doonayso in aad samaysid khariidad tuulo ama khariidad kastaba?
2) Maxay ku kala duwan yihiin khariidadda fasalka iyo tan tuuladu?
3) Waxa aad samaysaa khariidad tuulo, wax kasta oo lagama maarmaan ahna ku muuji?

## MIDABADA KHARIIDADDA

Waxa aad soo samaysay Khariidaddii tuulada waxa aadna u yeeshay midabo kala duwan. Khariidad kastaa waxay leedahay midabo kal jaad jaad ah. Midab kasta oo kuwaas ka mid ahna waxa uu leeyahay micne gooni ah. Midabada qaarna waa laysla yaqaan qaarna layslama yaqaanno.

Kuwa laysla yaqaanno waxa lagu muujiyaa abuurka dhulka: Buurihiisa, dooxooyinkiisa, balliyaashiisa, iyo kala sarreynta dhulka, waxuuna had iyo jeer ku yaallaa furaha khariidadda.

Kuwa aan laysla wada aqoon waa kuwii aad tuulada u samaysay oo kale, ama ka aad u samayn kartid degmada aad deggan tahay amase gobolkaaga iyo gobollada Soomaaliyeed oo dhanba. Gobol kasta iyo degmo kastaba waxa aad marin kartaa midab ka duwan kuwa kale. Waa in aad ku muujisaa furaha khariidadaas midab walba waxa aad ula jeedo.

Khariidadda juqraafiga dabeecadda midabada lagu isticmaalaa waxay jihiin: Biyaha waa buluug, dooxooyinku waa cagaar, lama degaanku waa casaan iftiimaya oo caddaan xiga, buuruhu waa casaan guduud xiga.

**LAYLIS:**

1. Midabada khariidadda kuwee baa laysla yaqaanaa, kuwee baanse laysla aqoon?
2. Kuwa laysla yaqaan xaggee lagu muujiyaa?
3. Aniga oo samaynaya khariidadda juqraafiga dabeecadda hadii aan badda mariyo rinji cas miyaan qumanahay?






## QAABKA DHULKA

U fiirso qorraxda marka ay soo baxayso, amase habeenkii dayaxa eeg. Waxa aad arkaysaa in ay sida kubbadda u wareegsan yihiin. Maxaan innagu ku rumaysannaa?

1) Magaalooyinkeenna badda xeebeheeda ku yaalla ee ay maraakiibtu ama doonyuhu ka dhoofaan ama yimaadaan, hadddii aad u fiirsatid markab ka baxaya xeebta magaalada, marka hore ee uu kuu dhow yahay waxa kuu muuqda markabkii oo dhan. Marka uu cabbaar kaa sii socdo waxa kaa qarsoomaaya markabka intiisa hoose oo dhan, dabadeedna tartiib buu kaaga wada libdhayaa ilaa uu kaa wada qarsoomo. Sidaas oo kalena markabka soo socda marka hore waxa kuu muuqanaya shooladda u sarraysa marka uu soo dhowaadana kulligiis. Meeshaas waxa inooga caddaanaaya haddii uu dhulku fidsanaan lahaa in markabkaas aynaan sidaas u aragneen ee aan si ka duwan u arki lahayn.



2) Waxa kale oo inoo caddaynaya in dhulku wareegsan yahay niman badmaax yaal ah oo adduunka ku soo wareegay.


3) Sawirro ay soo sawireen niman duuliyayaal ah.

**LAYLIS:**

1) Markab xeebta u dhow iyo mid ka fog midkee baad si fiican u wada arki kartaa? Maxaa ugu wacan?
2) Sawirka dhulka weligaa ma aragtay Siduu u eg yahay

CASHARKA LIX IYO TOBNAAD

## WAREEGGA DHULKA



Haddii aan casharkii hore ku baranay in dhulku wareeg-san yahay haddana waxaan is weydiinaynaa dhulku ma taagan yahay mise waa socdaa?

Dhulku waxa uu ku wareegaa udubdhexaadkiisa. Subax walba waxaan aragnaa in qorraxdu ka soo baxdo dhinaca bari, galabtiina ay u dhacdo galbeedka, iyada oo aad moodo inay socoto. Ma aha arrintu in qorraxdu socoto ee waxa la ogaaday in dhulku socdo, qorraxduna taagan tahay. Bal kubbad yar oo caag ah soo qaado meel yarna ka calaamayso, birna ka dhexdu-



si. Meesha aad joogtaa waa in ay ahaataa mugdi. Tooj ku da-ar kubbadda isla markaasna ku wareeji kubbadda birta, toojku waa in uu taagnaadaa.

Dhulku 24kii saacadoodba mar buu ku wareegaa udubdhexaad-kiisa. Taa waxa ka dhasha habeenka iyo maalinta. Qorrax-da aan toojka ku tilmaamay dhinaca ay ka haysaa waa maalin-tii dhinaca ka sii jeedaana waa habeenkii.

**LAYLIS:**

1) Sidee baa lagu ogaaday in qorraxdu taagan tahay dhul-kuna socdo?
2) Dhulku afar iyo labaatankii saacadood imisa wareeg buu sameeyaa?
3) Toojka iyo kubbadda lagu daaray maxay ka dhigan yi-hiin?

CASHARKA TODDOBA IYO TOBNAAD

## MEEREYSIGA DHULKA

Sida aynu ognahay dhulku waxa uu ku wareegaa udubdhexaadkiisa oo afar iyo labaatankii saacadoodba wareeg dhan buu sameeyaa. Dhulku waxa uu sameeyaa wareeg labaad isaga oo kiisii horena wata.

Wareegaa dambe waxa uu ku soo wareegaa qorraxda halkii sanaba mar ama (365 1/4) maalmoodba mar. Dhulku waxuu qaadaa waddo uu leeyahay oo la yiraahdo tub wareeg. Dhulku tub wareegiisaa geesna ugama leexdo.

Dhulka wareegiisu waxa uu u kala qaybsamaa afar qaybood oo mid kastaaba tahay xilli afarta xilli ka mid ah:

1. Gu'; 2. Xagaa; 3. Dayr; 4. Jiilaal.

Xilliyadaa cimiladoodu way kala duwan yihiin, mid roob badan mid kulul iyo mid ka sii duwanba.

**L A Y L I S :**

1) Sheeg waxay kala yihiin wareegga dhulka iyo meereysiga dhulku?
2) Dhulku imisa goor buu ku soo wareegaa qorraxda, waana imisa maalmood?
3) Halka sano waa imisa qaybood?



CASHARKA SIDDEED IYO TOBNAAD

## Qaybta Cimilooyinka Dhulka

Dhulka cimiladiisa guud ahaan waxay u kala baxdaa shan gobol oo waaweyn:

1. Gobol lagu magacaabo gobolkii kulaalayaasha, waxana uu u dhexeeyaa labada kulaale, ka woqooyi iyo kan koonfureed. Gobolkaasu had iyo jeer waa kulayl, habeenkiisa iyo maalintiisuna waa isla'eg yihiin ama waa isku dhow yihiin, waana roob badan yahay meelaha lama degaanka ah mooyaane. Meelahaas lama degaanka ah iyaga roobkoodu aad buu u yar yahay ama kamaba da'o.

2. Laba gobol oo la yiraahdo jiidda qabow, waxayna u dhexeeyaan labada kulaale iyo wareegga cirifyada.

Labadaa gobol aan kor ku soo sheegnay guud ahaan qabowgoodu waa meel dhexaad, waana geedo badan yihiin.

3. Laba gobol oo la yiraahdo jiidda barafleyda. Marka kor loo dhaafo cimilada jiidda qabow waxa ku xiga tan jiidda barafleyda. Cimiladaasu aad bay u qabowdahay roobna kama da'o, geedihiisuna nagaad bay u badan yihiin. Sannadka intiisa badan baraf baa ku daboolan dhulka intiisa badan.

**L A Y L I S :**

1. Gobolka kulaalayaasha xaggee laga helaa?
2. Soomaaliya gobolka ay ku taallaa haddii loo fiiriyo shanta gobol ee adduunka cimilooyinkiisu u kala baxdo waa xaggee?
3. Sheeg laba gobol oo ka mid ah gobollada cimilada dhulku u kala baxo iyo waxay ku kala duwan yihiin?

CASHARKA SAGAAL IYO TOBNAAD

# QAARADAHA IYO BADAHA WAAWEYN EE ADDUUNKA

Magaalada ama tuulada aad ku nooshahay waxay ka mid tahay dhulkeenna wanaagsan ee Soomaaliya. Dhulka Soomaaliyeedna waxa uu ka mid yahay qaaradda Afrika ee ballaaran. Qaaradda Afrikana waxay ka mid tahay qaaradaha adduunka ee waaweyn.


Adduunku waxa uu ka kooban yahay toddoba qaaradood oo midi lama degaan tahay lixna la deggan yahay.

Lixda la deggan yahay waa: Afrika, Aasiya, Yurub, Ameerikada Waqooyi, Ameerikada Koonfureed, iyo Austaraaliya. Midda aan la degganayni waa Antaartika.

## BADAHA WAAWEYN EE ADDUUNKA

Gloobku waxa uu u kala qaybsamaa bad iyo berri. Boqolkiiba 71 % Gloob waa bad, boqolkiiba 29 % ku kalena waa berri. Badaha waaweyn ee adduunku waa afar:

1) Badweynta Hindiya.
2) Badweynta Deggan.
3) Badweynta Atlaantika.
4) Badweynta Aartika.




**FURE:**

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Qaarada | Afrika |
| 2. | » » | Aasiya |
| 3. | » » | Yurub |



| | | |
|---|---|---|
| 4. | » » | Ustareeliya |
| 5. | » » | Mareekanka Waqooyi |
| 6. | » » | Mareekanka Koonfureed |
| 7. | » » | Aant Aartika |
| B. | Badweynta | Atlaantik |
| T. | » » | Degan |
| J. | » » | Hindiya |
| X. | » » | Aartika |




Khariidadda Xeebta Soomaaliyeed ee Badweynta Hindiya

Dhulkeenna waxay xeebtiisa bari ku taal Badweynta Hindiya, magaalooyinka xeebteeda ku yaallaana waxa ka mid ah: Xamar, Kismaayo, Marka, Baraawa, Hobyo.

**LAYLIS:**

1. Adduunku imisa qaaradood buu u kala qaybsamaa?
2. Magaalada ama tuulada aad deggan tahay qaaradee ama waddankee bay ku taallaa?
3. Qaaradaha la deggan yahay waa kuwee?
4. Gloobka qiyaastii intee baa bad ah, intiise berri ah?
5. Badaha waaweyn ee adduunka sheeg? Soomaaliya xeebta bari baddee bay ku taal?



## CASHARKA LABAATANAAD
## GAADIIDKA IYO ISGAARSIINTA

Ujeeddooyinka horumarinta gaadiidka iyo isgaarsiinta dalka Soomaaliyeed ka leeyahay waxa ka mid ah:

1. In la furo meelaha aan wax horumar ah laga sameyn si dhaqaalaha loo kordhiyo.
2. In la abuuro xiriir isku xira suuqyada wax lagu gado ee dalka gudihiisa. Taas waxa loola jeedaa in gobol walba oo dalka ka mid ahi kuwa kale si hawl yar u gaarsiiyo waxyaalaha uu soo saaro.
3. In la suurogeliyo sida ugu qiimo jaban ee badeecadda iyo shaqooyinka dhulka, cirka iyo badda laysugu xiri lahaa.
   Arrintaas waxa lagu ilaalinayaa helliinka iyo sicirka alaabta badeecadda ah miyi iyo magaaloba.
4. In la sameeyo isgaarsiin awood fiican leh oo ka dhexeysa dalka gudihiisa iyo dibeddisaba si dunida degdeg wararka loogu diri karo loogana heli karo.
5. In hore loo mariyo boosaha si ay ugu shaqayn karaan dadka badan oo aan la qiyaasi karin ee iminka afkoodii oo qoran ku adeegsanaya.

Haddii aynu dib u eegno sidii gaadiidka adduunyadu hore ugu maray iyo marba heerkii uu joogay waxaynu arkaynaa:

1. In qalabka dadku haysto ee uu u baahan yahay maalinba maalinta ka dambeysa soo kordhayo. Sida darteedna baahida gaadiidku la kordhaysay.
2. Waxa iyana jirtay in markii adduunku isu furmay loona baahday in meela kala durugasan wax laysaga geeyo iyana waxay lagama maarmaan ka dhigtay gaadiid dheereeya iyo isgaarsiin habboon in la helo.
3. b) Baahidii qofka oo badatay.
   t) Dadkii oo fikirkiisu isbeddelay oo arkay in aanu kala maarmayn.
   j) Dunidii oo isu furantay waxay keentay xayawaankii dadku haystay in ay rartaan markii ugu horreysay. Marba sidii uu talaabo hore ugu qaadayey dadku waxa uu gaaray halka uu maanta joogo.

**Laylis:**

1. Sheeg saddex (3) qodob oo horumarinta gaadiidka iyo isgaarsiinta dalka aynu uga dan leennahay.

Hawraaraha soo socda teebaa run ah teebase been ah.

1. Si aanay degmona degmo ugu baahan ayaa loo kordhiyey gaadiidka iyo isgaarsiinta.
2. Gaadiidka iyo isgaarsiintu way isu soo dhoweeyeen adduunka.
3. Baahida dadku waqtiba waqtiga ka dambeeya bay sii badanaysaa.
4. Dadka adduunka ku nooli ma kala maarmi karo.
5. Af Soomaaliga qoristiisu si aad ah bay u caawisay xiriirka dalka iyo dadkaba.



CASHARKA KOW IYO LABAATANAAD

## GAADIIDKA ADDUUNKA

Gaadiidka adduunku waxa uu u qaybsan yahay saddex ja-ad:

1. Gaadiidka dhulka:
2. Gaadiidka Cirka :
3. Gaadiidka Badda (Biyaha).

Waxaynu ognayhay in waddan walba khayraadkiisu ku filiqsan yihiin. Markaa waxa lama huraan ah in waddan kastaaba dhisto gaadiid wanaagsan oo waddanka gudihiisa iyo dibediisa isku xira. In kasta oo dalka Soomaaliyeed qaybaha gaadiidku u kala baxo mid walba uu wax ka leeyahay, haddana waxa ugu muhimsan gaadiidka dhulka. Baabuurta la raaco lagama haqab la' waayo waxay u baahan tahay waddooyin laga shaqeeyey oo waddanka ku dhan. Taasina weli dalku ma gaarin.

Gaadiidka kale ee dhulka ee soo raaca Baabuurta waxa weeye xoolaha. Sida aynu ogsoon nahay dadka Soomaaliyeed badidiisu waa reer guuraa. Dadkaasi gaadiidka ay alaabta ku qaataan marka ay meel ka guurayaan, marka ay dhaansanayaan, marka ay safrayaan iyo marka ay guriga oodayaan waa xoolo ay ka mid yihiin awrta, dameeraha, fardaha, iwm.

Mar haddii aynu niri gaadiidka dhulka ayaa ugu muhimsan marka aan eegno jidadka dalka iyo sida wax looga qabanaayo.

**LAYLIS:**

1. Imisa qaybood buu adduunka gaadiidkiisu u qaybsamaa?
2. Sheeg nooca gaadiidka ugu raqiisaysan (jaban), dhulka, badda, iyo cirka? Waayo?
3. Goobaabin geli lambarka jawaabta saxa ah:
   - b) Soomaalida inteeda badani waa reer guuraa.
   - t) Soomaalidu gaadiidka ay isticmaasho waax ugu badan baabuurta iyo maraakiibta.
   - j) Xoolaha gaadiidka laga dhigtaa waxay u baahan yihiin waddooyin laami ah oo fiican.
   - x) Gaadiidkii u horreeyey ee dadku isticmaali jiray waxa uu ahaa xoolaha.
   - kh) Doonyaha ayaa u horreeyey gaadiid u dadku isticmaalo.
   - d) Meel fiican buu gaaray gaadiidka dalka Soomaalidu dhammaan dhulka, cirka, iyo baddaba.

CASHARKA LABA IYO LABAATANAAD

## JIDADKA DALKA SOOMAALIYEED

Guud ahaan jidadku laba qaybood ayey u qaybsan yihiin:

1. Qaybta hore waa mid aan laga shaqayn oo ciid leh. Jaadkaa oo waddooyinka dalku u badan yihiin baabuurtu aad bay ugu dhib qabaan waayo:

B) Mar carro guur ayaa ku dhaca, ciiddii marka ay socotana dhagxaan baabuurku ku rafaado ayaa waddooyinka ka soo baxda.

T) Marna waa xilliga roobabka oo muddo ayey xiran yihiin, ama dhibaatooyin badan bay keenaan.

2. Jidadka qaybta kale waa kuwa laamiga ah ee laga shaqeeyey mar walbana la mari karo. Jaadkaa oo ah kuwa keliya oo la mari karo si horumar loo sameeyo xagga gaadiidka, dawladda kacaanka ee Soomaaliya aad bay ugu dadaalaysaa in wax laga qabto.

Sidaa darteed: waxa la sameeyey idaarad ka shaqaysa jidadka haddii ay tahay keenida alaabta jidadka lagu sameeyo iyo haddii ay tahay shaqaale wax la baroba.

1. **Hargeysa-Berbera:** Waxa dhismihiisa gacanta lagu hayaa jid laami ah oo isku xira Hargeysa iyo Berbera dhererkiisuna yahay 156 km. Waxa jidkaas dhisaya Bankiga Horumarinta Afrika waxaana lagu wadaa in uu dhammaado sannadka 1975.
2. **Beletweyne-Burco:** Jiddkani waa ka ugu dheer waddanka gudihiisa. waxa uu isku xiraa Muqdisho iyo Burco, waayo Muqdisho-Beletweyne inta u dhexaysa waa la hagaajiyey. Jidka dhererkiisu waa 1,045km. Jidkaasi dhibaatooyin badan ayuu daaweynayaa waayo waddankii kala xirnaa ayuu isu furayaa. Jidkaas waxa lagu qiyaasay in uu ku kaco 387 malyuun oo ay bixinayso dawladda Shiinuhu.
3. **Jowhar-Buuloburde:** Jid Xamar ka taga oo Feerfeer gala oo Talyaanigu dhisay aadna u xumaaday waxa loo xilsaaray Idaaradda Jidadka. Si fiican ayey u dhammayeen bartamihii 1974 waxaana la geshay lacag dhan 10 Malyuun.



4. Waxa kale oo jaangooyada ku jira in la hagaajiyo ama la dhiso waddooyin badan oo ay ka mid yihiin.

b) Hargeysa-Boorama: wado isku xiraysa Hargeysa iyo Boorama iyo far yar oo Wajaale u leexandoonta. Wadadaa dhererkeedu waa 150 km.

t) Golweyn-Jilib: (270 km.) — jidkani dhul badan oo beero leh ayuu isu furi doonaa.

j) Berbera — Burco (140 Km.)
waxa uu aad wax uga tarayaa dhoofidda xoolaha nool iyo geedaha ay cunayaan.

**LAYLIS:**

1. Sheeg sababaha aanay dadkii hore qalabka isgaadhsiinta ugu baahnayn?
2. Waddannadii la gumeysan jirey markii ay madaxbannaannaadeen dhibaatooyin bay kala kulmeen xagga gaadiidka iyo qalabka isgaarsiinta. Maxay ar taasi ku dhacday?
3. Ka faallood gaadiidka dhulka ee Soomaaliya. Sheeg dhalliilaha uu gaadiidkaasu leeyaha?
4. Wadada laamiga ah oo waddanka ugu dheer yaa dhisay?
   Maxaad u malaynaysaa in ay waxtar ummadda u yeelan doonto wadadaasi?
5. Waa maxay dhibaatooyinka lagala kulmayaa jidadka aan laamiga ahayn?
6. Waddooyinka laamiga ah intooda badan waxa la sameeyay:
   b) Kacaanka ka hor.
   t) Intii Kacaanku jiray.
   j) Intii gumeystuhu waddankeenna haystay.
7. Waddanna hore uma maro haddii aanu yeelan:
   b) Gaadiid habboon — Dhulka, Cirka iyo Baddaba.
   t) Ciidan Xoog leh.
   j) Madax Milateri ah.

CASHARKA SADDEX IYO LABAATANAAD

## GAADIIDKA BIYAHA

Waxa lagama maarmaan ah in Wadankii horumar doonayaa uu yeesho maraakiib waddani ah. Dadka dalka gudihiisa wax ka soo saaraa waa in ay ku tiirsan yihiin gaadiid badan oo aan laga welwel qabin. Marka waxa loo baahan yahay in la helo maraakiib waddani ah. Dadka dalka gudihiisa wax ka soo saaraa waa in ay ku tiirsan yihiin gaadiid badan oo aan laga welwel qabin. Marka waxa loo baahan yahay in la helo maraakiib waddani ah. Kuwaas waxa lagaga baxayaa dhibaatada gaadiidka badda, waxa laga helayaa faa'iido, dhaqaale iyo shaqo.

Soomaaliya waxay heshiis gaadiidka badda ku saabsan kula jirtaa dawladda Liibiya. Maraakiibtaasi waxay guraan wixii alaab dalka ka dhoofaya ama soo gelaya. Haddii aynu eegno dalka gudihiisa shaqa badan gaadiidka baddu kama qabto waayo:

1. Webiyadu kuma habboona inay maraan doonyaha iyo maraakiibtu.
2. Waxa iyadana jirta in aan waddanka gudihiisa laga helayn badeecad badan oo maraakiibtu qaado.
3. Waxa lagama maarmaan ah in la sameeyo dekedo maraakiibtu ku xiran karto, waxna ku dejiyaan lagana raro.

Dekedaha Soomaaliya ee waaweyn iyo waxa ka soo dega ama ka dhoofa:

| **Dekedaha Waaweyn** | **Wax ka dhoofa** | **Wax ka soo dega** |
|---|---|---|
| 1. Muqdisho | Hargaha iyo Hilibka | Dekedahani waxay |
| 2. Marka | Muuska iyo Kabaha Gobolka Shabeelle Hoose lagu sameeyo. | soo dejiyaan waxyaalo isu dhow oo dalka looga baahan yahay, oo ay ka |
| 3. Kismaayo | Xoolaha nool, Hargaha iyo Muuska | mid yihiin Baasto, Bariis, Dhar alaabta wax lagu dhiso, baabuuta, iyo wixii la mid ah. |
| 4. Berbera | Beeyada iyo Malmalka, Iwm. | |



Intaa waxa soo raaca dekeddo yaryar oo laga dejin karo waxyaalaha lagama maarmaanka ah oo ay ka mid yihiin cuntada, isla markaana waxa laga dhoofin karaa waxyaabo yaryar.

Dekedaha noocaas ah waxa ka mid ah: Boosaaso, Laasqoray, Maydh, Eyl, Qandal, iyo Calawla.

**LAYLIS:**

1) Gaadiidka biyaha ee Soomaaliya wax aad ah kama qabto xiriirinta waddanka gudihiisa. Seeg sababta ay arrintaasu u dhacdo?
2) Sheeg shan magaalo oo ka mid ah magaalooyinka caanka ah ee xeebaha Soomaaliyeed ku yaal.
3) Magaalooyinka xeebaha Soomaaliya ku yaalla oo dhan ma waxbaa laga soo dejin karaa? Waayo?
4) Sheeg dekedaha Soomaaliya inta alaab door ah laga diri karo lagana soo dejin karo.
5) Sheeg dekedda Berbera, ta Marka, iyo ta Kismaayo shan wax oo mid kasta ka soo dega iyo waxa ugu badan oo mid walba laga dhoofiyo.

CASHARKA AFAR IYO LABAATANAAD

## GAADIIDKA CIRKA

Gaadiidka cirka ee Soomaaliya waa nooca cusub oo isku taxalujiya in uu xiriirinta waddanka gudihiisa wax weyn ka qabto. Inkasta oo taasi jirto haddana weli halkii laga rabay in uu xiriirinta dalka ka galo aad ayuu uga hooseeyaa, waayo:

1. Innaga iyo waddanada soo korayaaba dhaqaaleheenna ayaan inoo oggolaanayn in uu gaadiidkeenna cirku la mid noqdo ka waddanada hore u maray. Gaadiidkooda cirku waa mid aad u da' weyn oo hore uga gudbay dhibaatooyinka maanta gaadiidkeenna cirka haysta.

2. Waxa kale oo jirta in gaadiidkeenna cirka dayuuradihiisu iyo duuliyayaashiisu aad ay u yar yihiin. Taasuna waxay keentay in qiimaha dayuuradaheenna lagu raacaa uu aad qaali u noqdo, sidaa darteedna, dadka dayuuradaha raacaa waa dad aad u yar. Waxa la saaraa alaab yar oo ay ka mid yihiin alaabta jajabaysa iyo alaabta degdegga loogu baahan yahay.

LAYLIS:

**Hadday weertu run tahay «R» ku qor meesha bannaan haddii kalena «B» ku qor.**

1) Gaadiidka cirku waa ka ugu jaban.
2) Gaadiidkeenna cirku, isgaarsiinta waddanka qaybta u weyn buu kaga jiraa.
3) Diyaaradaha iyo duuliyayaashuba way inagu filan yihiin.
4) Dadku diyaaradaha si aad ah ayey u raacaan.
5) Alaabta diyaaraduhu qaadaan aad bay u badan tahay.
6) Kirada dayuuraduhuh haddii ay jaban tahay dad badan ayaa raaci lahaa.



CASHARKA SHAN IYO LABAATANAAD

## SHIRKADDA DAYUURADAHA SOOMAALIYEED

Shirkadda waxa la asaasay 5tii Maarso 1969, waxayna ka dhisan tahay raasamaal boqolkiiba konton (50) ay leedahay dawladda Soomaaliyeed, barka kalena shirkad Talyaani ah ay leedahay. Bishii Janaayo 1970 ayaa maamulka dayuuradaha la Soomaaliyeeyey. Intaa ka dibna Shirkaddu 51 % waxa yeelatay dawladda Soomaaliyeed, 49 % na shirkad Talyaani ah. Dayuuradaha shirkaddu waxay ka kooban yihiin:

1) 2 Faykawnt oo nooca lambarkoodu yahay 785 oo afar toor leh.
2) 3 DC-3 oo laba matoor leh.
3) 3 nooca loo yaqaan sesna 180 iyo 260 oo hal matoor leh.
4) Mid weyn oo laga ijaaray Ingiriiska oo ah Boowin 720B.

Labada Faykawnt, saddexda DC-3 iyo Boowin 720B waa dayuurado qaada dadka iyo alaabtaba. Saddexda dayuuradood oo sesnada ah gaar ahaan baa loo ijaartaa. Intaa waxaan ku koobaynaa gaadiidka jaadadkiisa saddexda ah.

**GEGOOYINKA :**

Gegooyinka dalku waxay u qaybsamaan laba nooc:

Qaar laga shaqeeyey oo ay dayuuraduhu markasta fariisan karaan iyo qaar aan laga shaqayn oo marka roobabku da'aan dayuuraduhu aanay fariisan karin. Gogooyinka fiican waxa Gegada Muqdisho, Hargeysa, iyo ta Kismaayo.

LAYLIS:

1) Kacaanka ka hor, boqolkiiba imisa ayay Soomaalidu laheyd shirkada Dayuuradaha?
2) Sheeg waqtiga maamulka shirkadda Diyaaradaha la Soomaaliyeeyey?
3) Waa imisa tirada diyaaradaha shirkaddu?
4) Noocyada diyaaradaha shirkaddu waa maxay?
5) Sheeg nooca qaada dadka iyo alaabta diyaaradaha shirkadda?
   Nooceese gaar ahaan loo ijaartaa?
6) Sheeg saddexda gego ee ugu waaweyn gegooyinka diyaaradaha dalkeenna.

## WAKAALADDA WARARKA

Wasaaradda warfaafinta iyo Hannuuninta Dadweynuhu waxay u kala qaybsantaa:

1) Waaxda Idaacadaha Soomaaliyeed.
2) Waaxda wargeysyada.
3) **Golaha Hiddaha iyo Dhaqanka.**
4) **Wakaaladda** Madbacadda Qaranka.
5) Wakaaladda Filimada Soomaaliyeed.
6) Wakaaladda wararka Soomaaliyeed.

## WAKAALADDA WARARKA SOOMAALIYEED (SONNA)

Wakaaladda Wararka Soomaaliyeed waa wakaaladda keliya oo ka mas'uul ah inay ka soo ururiso wararka gobollada iyo degmooyinka uu dalku ka kooban yahay. Markaasa yaa Wakaaladdu wararka u qaybisaa Idaacadda iyo wargeysyada. Waxa wararka soo dira weriyeyaal joogta ah oo gobollada jooga. Mararka qaarkood weriyeyaal baa ku mara kormeer dalka si ay wax uga soo qoraan hawlaha faraha badan ee ka socda waddanka. Waxay kale oo wararka ka heshaa telegaraamyo ama waraaqo ay u soo diraan xarumaha Boolisku iyo Guddoomiyeyaasha gobollada iyo degmooyinku. Waxay kale wararka caalamiga ah ka qaadataa wakaaladaha adduunka ee waaweyn. Wakaaladdu waxay u kala baxdaa:

1. Qaybta wararka (gudaha iyo dibedda).
2. Qaybta dhegaysiga Idaacadahas hisheeyaha.
3. iyo Qaybta soo tebisa wararka.

### LAYLIS:

1) Qor saddexda qaybood oo wakaaladda wararku u kala baxdo.
2) Sidee bay Idaacadda iyo wargeysyaduba u helaan wararka?
3) Waa maxay labada (2) wax ee u horreeya ee xilka weyni ka saaran yahay Wakaaladda Wararka?
4) Shaqada weriyayaashu maxay tahay?
5) Siday wararka caalamiga ah Wakaaladda Wararku u heshaa?





## WAKAALADDA MADBACADDA QARANKA

Wakaaladdu heer weyn ayey kaga jirtaa horumarinta dalka, faa'iidadeeduna aad ayey uga sii ballaaranaysaa heerka ay maanta joogto. Dhowr arrimood oo dhacay intii Kacaanku ka curtay dalka ayaa waxay ka dhigeen Wakaaladdan mid hawlaheedu lagama maarmaan yihiin.

Marka ugu horreeysa, ilaa intii dalku dawladnimada qaatay far Soomaalida qoristeeda ayaa ugu muhimsan wixii horumar la gaaray. Arrintaasi waxay aad u badisay baahidii loo qabay wax qoran oo lagu isticmaalo xafiisyada dawladda, dugsiyada iyo wax dadweynuhu akhristo. Baahida loo qabo waxa qoran waxa sii kordhiyey ololé weyn, oo lagu cirib tirayo wax akhris iyo qoris la'aanta oo dalka oo dhan ku fiday. Halkaa waxa ka cad baahida aan la koobi karin oo loo qabo daabacaadda. Iminka waxa ka soo baxa:

1) Kutub loogu talagalay dugsiyada Hoose, Dhexe, iyo Sare ee dalka. Waxa wehesha qaar ololaha farta iyo dadweynaha loogu talagalay.
2) Kutub Soomaali ah ama loo tarjimay oo kala duwan.
3) Wax alla waxa dawladdu ku shaqayso ee xafiisyada lagu isticmaalo.
4) Wargeysyo ay ka mid yihiin:
   b) Xiddigta Oktoobar oo maalin walba soo baxda.
   t) Waaga cusub oo bishiiba mar ka soo baxda.

### LAYLIS:

**Weerto haddii ay run tahay «R» ku qor meesha bannaan, haddii kalena «B».**

1) .................................... Madbacadda Qaranku kaalin weyn bay kaga jirtaa horumarka waddanka.

2) .................................... Horumarka ugu weyn ee aynu gaarnay ilaa iyo intaynu xorriyadda qaadanay waa qorista af Soomaaliga.

3) ........................................ Waxyaalaha qoran ee xafiisyada lagu isticmaalo, bar ahaan bay Madbacadda Qaranku soo saartaa.

4) ........................................ Ololaha ciribtirka wax akhris iyo wax qoris la'aantu Madbacadda muhiim buu ka siidhigay.

4) ........................................ Kutubta dugsiyada lagu dhigo qayb yar oo ka mid ah baa ka soo baxda Madbacadda Qaranka.

6) ........................................ Kutub qalaad oo Af Soomaali lagu tarjumay kama soo baxdo Madbacadda Qaranka.

7) Wargeyska Xiddigta Oktoobar labadii maalmoodba mar buu ka soo baxaa Madbacadda Qaranka.

8) ........................................ Wargeyska Waaga Cusubi bishiiba laba jeer buu Madbacadda Qarankak a soo baxaa.